Somaliska

# Ku socota qofka qaraabada ah

## MACLUUMAAD, TAAGEERO IYO HAGID
## MARKA QOF QOYSKA KA MID AH XORRIYADA LAGA QAADO



Bufff

# Ku socota qofka akhrisanaya

In qof xubin qoyska ka mid ah xoxorriyaddiisa laga qaado waxay gebi ahaanba qalqal gelin kartaa nolosha. Waxay kicin kartaa dareenno xooggan, keeni kartaa walwal, isla markaana dhalin kartaa su'aalo badan – carruurta iyo dadka waaweynba. Xaaladda noocaas ah way fududahay in qofku dareemo kelinimo, laakiin keligiis ma tihid.

Bufff waa urur u taagan xuquuqda carruurta, kaas oo u adeega carruurta, dhalinyarada iyo qoysaskooda marka qof qoyska ka mid ah xorriyaddiisa laga qaado. Waxaanu bixinaa taageero, hagitaan iyo goob ammaan ah oo aad ku soo hiran kartaan – iyadoo aan loo eegin waxa dhacay. Agabkani wuxuu hordhac u yahay waxa dhici kara marka qof ehel ah xoriyadda laga qaado, xuquuqda ay carruurtu leeyihiin, iyo sida carruurta loogala hadli karo arrimaha adag.

Keligaa ma tihid. Bufff waxay u joogtaa inay ku dhageysato, ku taageerto, kuuna caawiyo – si waafaqsan doonistaada.

# Marka qof xubnaha qoyska ka mid ah xoriyadda laga qaado – oo adiguna aad tahay qof qaraabo ah

Marka qof aad isku dhowtihiin xoriyadda laga qaato, noloshu waxay isbeddeli kartaa hal ilbidhiqsi gudaheed. Waxay u dhici kartaa si kedis ah oo aan la sii filayn, waxaana gebi ahaanba isbeddelaya noloshaadii caadiga ahayd – dhinac kasta, ha ahaato dhinaca dareenka ama dhinaca nolosha dhabta ahba.

Dad badani waxay dareemaan naxdin, murugo, walaac ama cadho. Isla markaasna, waxaa dhalanaya su'aalo iyo fikrado badan. Maxaan sameeyaa hadda? Sideen carruurta ugu sheegaa? Yaan la hadli karaa?

Buuggan yar waxaa loogu talagalay qofka ay qof xubnaha qoyskiisa ka mid ah xoriyadda laga qaaday – ha ahaado qofka aad nolosha wadaagtaan, waalid, walaal ama qof kasta oo kale oo muhiim u ah noloshaada. Halkan waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan waxa dhaca marka qof xoriyadda laga qaado, sida ay u saamayso carruurta iyo dadka waaweyn, iyo sida aad ku heli karto taageero.

## Qofka qaraabada ah – dareennada, mas'uuliyadaha iyo taageerooyinka

Adigoo ah qofka ehelka, inta badan waxaad ku dhacdaa xaalad aadan adigu dooran – balse ay tahay inaad la tacaasho. Waxaa laga yaabaa inay kugu soo korodho inaad wax ka qabato dareennada carruurta, inaad la xiriirto hay'adaha dawladda, ama aad dadka hareerahaaga jooga u sharraxdo waxa dhacay. Isla markaasna, dad badan ayaa isku daya inay dadka kale u muujiyaan adkaysi, iyagoo xitaa ilaabaya baahiyahooda gaarka ah.

Waa muhiim inaad ogaato in aanad keligaa ahayn. Waa culays aad u weyn inaad ehel u tahay qof xoriyaddiisii laga qaada, waana wax iska caadi ah inaad dareento dareenno badan oo mararka qaar iska hori-manaya. Waxaad xaq u leedahay inaad dareemto murugo, walaac, cadho iyo jahawareer. Sidoo kale, waxaad xaq u leedahay inaad hesho taageero.

## Markay carruurtu saameyn ku yeelato

Marka waalid, walaal ama qof weyn oo muhiim u ah si lama filaan ah uga baxo nolol-maalmeedka ilmaha, way saamaysaa ilmaha – mararka qaarkoodna saameynta si degdeg ah looma arko. Carruurta qaarkood waxay weydiiyaan su'aalo badan, kuwo kalena way ka aamusiyaan sidii caadiga ahayd. Qaar ka mid ah carruurtu waxay isku dayaan inay noqdaan kuwo edeb badan oo aan culays ku noqon dadka waaweyn. Kuwo kalena waxay si cad u muujiyaan dareenkooda. Carruurta oo dhami si kala duwan ayey uga falceliyaan – balse carruurta dhammaantood way saamaysaa.

Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan waxa dhacaya, si ay u fahmi karaan. Macluumaad cad oo daacad ah, oo la waafajiyey da'da iyo heerka fahamka ilmaha, wuxuu abuuraa dareen ammaan ah. Haddii carruurta aan la siinin macluumaad, way fududahay inay sameeyaan faham iyaga u gaar ah, sida in waxa dhacay ay iyagu sabab u yihiin ama ay tahay wax laga xishoodo. In la ogaado, in la waydiiyo su'aalo, in la muujiyo dareenka – arrimahaas waxay sameeyaan farqi weyn.

## In carruurta lagala hadlo arrimaha adag

In carruurta lagala hadlo in qof qaraabo ah xorriyaddiisa laga qaaday wuxuu dareemi karaa inay tahay arrin aad u adag. Waxaa laga yaabaa in aanad garanayn waxa aad ku odhanayso ama aad ka baqayso inuu ilmuhu sii calool xumaado . Laakiin carruurtu badanaa way ka sii roonaadaan marka loo sheego waxa dhacay halkii laga qarin lahaa. Way dareemayaan marka wax khaldan yihiin, haddii dadka waaweynna aanay runta sheegin, taasi waxay ku abuuri kartaa welwel ka sii badan.

Waxa ugu muhiimsan ma aha inaad hayso jawaabaha oo dhan, balse waa inaad ku dhiirato inaad noqoto mid daacad ah, dhageysta, isla markaana si dhab ah u qaadata su'aalaha ilmuhu ku weydiinayo. Waxaad u sheegi kartaa inta aad adigu ogtahay, waxaadna u sheegi kartaa in aanad wax kasta ogeyn, adigoo wadahadalka u qaybinaya heerar kala duwan. Waxa muhiim ah inuu ilmuhu dareemo inuu qayb ka yahay xaaladda, la dhageystay, lana fahmay – xitaa marka laga hadlayo arrin aad u adag sida qof xoriyaddii laga qaaay. Bufff waxay kaa caawin kartaa haddii aad u baahato taageero ku saabsan wadahadalladaas.



# Habraaca sharciga – tallaabo tallaabo

Marka qof looga shakiyo dembi, waxaa bilaabma habraac sharci. Wuxuu u muuqan karaa mid dhib badan, gaar ahaan haddii aanad hore ula kulmin nidaamka garsoorka. Halkan waxaa ku qoran dulmar guud oo la fududeeyay:

## Qabasho iyo wareysi

The police can arrest a person suspected of committing a crime. The person is questioned, and the prosecutor decides whether the person should be detained.

## Xirnaansho ku meelgaar ah:

Inta lagu jiro xirnaanshaha kumeel gaarka ah, qofka waxaa la hayn karaa ilaa 72 saacadood, iyadoo baaritaanku uu sii soconayo.

### Rumaan/xabsi ku hayn:

Maxkamadda ayaa go'aamisa haddii qofka xabsiga lagu sii haynayo, taas oo macnaheedu tahay in qofku sii xirnaanayo ilaa inta maxkamadayntu ka bilaabanayso. Mararka qaarkood maxkamaddu waxay go'aamisaa in qofka aan loo oggolaan inuu xiriir la sameeyo dadka dibadda jooga, tusaale ahaan iyadoo laga mamnuucayo booqashada ama wicitaanka telefoonka – xadidaadaha noocaas ah waxaa loo yaqaannaa xayiraado, waxaana loo isticmaalaa in lagu ilaaliyo baaritaanka dembiga.

### Maxkamadaynta:

Marka uu dhammaado baaritaanka hordhaca ahi, xeer-ilaaliyaha ayaa go'aamiya in dacwad lagu soo oogo qofka. Inta ay socoto dhageysiga maxkamaddu, waxay maxkamaddu dib u eegis ku sameysaa cadaymaha, waxayna go'aan ka gaartaa dembiga iyo ciqaabta xukunka.

### Xukun:

Xukunka waxaa lagu dhawaaqaa isla markaaba ama maalmo yar gudahood. Wuxuu noqon karaa xabsi, daryeelka ciidanka asluubta ama ciqaab kale. Xukunka waxaa rafcaan looga qaadan karaa muddo saddex toddobaad gudahood ah.

# Sidee ayey qoyska u saamaynaysaa?

Marka xubin qoyska ka mid ah xoriyaddiisa laga qaado, nolosha caadiga ah ayaa isbeddesha. Doorarkii xubnaha qoysku way isbeddeli karaan, waxaana caadi ah in la dareemo walbahaar, walaac ama kelinimo – gaar ahaan marka aanad garanayn waxa dhacaya.

## Rumaan/xabsi ku hayn:

Waqtiga xabsiga rumaanka ku jiro waxaa la dareemi karaa mid aad u adag. Qofka xornimaddiisii laga qaaday inta badan looma oggolaado inuu xiriir la sameeyo qoyskiisa sababo la xiriira xayiraado. Hubanti la'aantu waxay keentaa daal iyo walbahaar, wuxuuna qofku dareemi karaa culeys iyo kelinimo intaba.

## Xabsi:

Marka uu qof xabsi galo, nolosha caadiga ah ee qof kasta ayaa saameyn karta. Muuqaalka maqnaanshuhu badanaa waa mid xoogan, gaar ahaan carruurta., gaar ahaan carruurta. Waxaa loo baahan yahay oggolaansho si la isu maqlo ama la isu arko, booqashooyinkuna waxay noqon karaan kuwo lala socdo (la korjoogteeyo). Inta badan, waxaa jiri kara masaafo fog oo u dhaxaysa ilmaha iyo qofka xoriyadda laga qaaday, taas oo xiriirka sii adkayn karta.

## Daryeelka ciidanka asluubta:

Xitaa haddii aanu qofku xirnayn, daryeelka ciidanka asluubtu (frivård) aad ayuu u saameyn karaa qoyska. Kormeerka, xirashada qalabka elektaroonigga ah ee cagta (fotboja), ama shuruudaha wadahadallada iyo baaritaannadu waxay abuuri karaan hubaal la'aan – gaar ahaan dhinaca mas'uuliyadda, kalsoonida iyo doorka xubnaha qoyska.

## Sii-deyn shuruudaysan:

Marka qofka laga soo daayo xabsiga xilli hore iyadoo loo eegayo sii-dayn ay shuruudi ku xiran, waxaa jira xeerara gaar ah oo ay tahay in la raaco. Tani waxay abuuri kartaa rajo – laakiin sidoo kale walaac, gaar ahaan haddii qoyska aanu hubin sida qofka loogu soo celin doono dib ula qabsashada nolol maalmeedka.

## Masaafurin:

Haddii qofku aanu ahayn muwaadin iswidhish ah, waxaa lagu xukumi karaa in laga saaro dalka. Tani waxay noqon kartaa mid kumeelgaar ah ama mid weligeed ah. Qoyska dhexdiisa, tani waxay kicin kartaa murugo xooggan, walaac iyo su'aalo badan oo ku saabsan mustaqbalka.

# Xiriirka lala samaynayo ehelka ah ee qofka xoriyaddiisa la qaaday

Maintaining La xiriirka qofka xabsiga ku jira waxay u muuqan kartaa mid adag– dhinac kasta, ha ahaato dhinaca dareenka ama dhinaca nolosha dhabta ahba (praktiskt). Kuwani waa qaar ka mid ah qaybaha muhiimka ah:

## Wicitaanka telefoonka (INTIK):

Qofka xabsiga ku jiraa wuxuu ka soo wici karaa nidaamka telefoonka ee Daryeelka dembiilayaasha – kaas oo loo yaqaanno INTIK ama INTIK Play. Waa inaad marka hore oggolaataa in lagula soo xiriiri karo. Ehelka laftoodu ma soo wici karaan gudaha xabsiga.

## Waraaqo la soo qoro

Waraaqaha waxaa lagu soo diri karaa adeegga Waaxda daryeelka dembiilayaasha, xitaa haddii aanad garanayn meesha uu qofku ku xiran yahay. Waraaqaha waa lagu baari karaa (la akhrin karaa), gaar ahaan markuu qofku rumaan ahaan u xiran yahay (häkte).

Kriminalvården
Journalverket
601 80 Norrköping

Ku qor magaca iyo lambarka aqoonsiga (personnummer) ee qofka loo dirayo baqshadda gudaheeda, sidoo kale ku qor magacaaga iyo lambarkaaga aqoonsiga qaybta qofka soo diraya (avsändare). Haddii qofku ku jiro xabsiga, Waaxda daryeelka dembiilayaasha ayaa markaa warqadda u sii gudbin doonta, haddii kalena dib ayey kuugu soo celin doonaan.

## Booqasho:

Booqashada waa inay ansixiyaan Waaxda dareyaalka dembiilayaashu. Si aad u booqato qof xiran, waxaad inta badan u baahan tahay inaad codsato oggolaansho booqasho oo aad u gudbisid xabsiga (anstalten) ama qaybta uu rumaanka ee uu qofku ku jiro. Tan waxaa lagu sameeyaa adigoo buuxinaya foom gaar ah oo loo gudbinayo ama loo dirayo Waaxda daryeelka dembiileyaasha. Carruurta waxaa loo baahan yahay oggolaanshaha waalidka mas'uulka ka ah. Booqashooyinku waxay noqon karaan kuwo la kormeerayo (la ilaaliyo) ama kuwo aan la kormeerayn, taas oo ay ku xiran tahay qiimeynta dhinaca amniga.

## Fasaxyada:

Qofka xiran waxaa xaaladaha qaar la siin karaa fasax – taas oo macnaheedu yahay inuu si kumeelgaar ah uga bixi karo xabsiga, tusaale ahaan arrimo muhiim ah oo qoyska khuseeya ama dib ula qabsashada bulshada. Haddii fasaxu yahay mid loogu talagalay inuu kula kulmo carruurta, waxaa la codsan karaa in kulankaas lagu qabto xafiiska Bufff.

# Xuquuqda carruurta ee ku aaddan la kulanka waalidka ama qofka ehelka ee xoriyadda laga qaaday

Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay xiriir la lahaadaan waalidka – xitaa haddii xoriyaddii laga qaaday – ilaa inta ay taasi ku jiro danta ugu wanaagsan ilmaha. Wada-joogga iyo kulanku waxay muhiim u yihiin dareenka amniga ee ilmaha iyo inuu fahmo nolosha qoyskiisa.

Xaaladdaha qaarkood maxkamadda ayaa go'aamisa in kulan ama wadahadal uu dhaco, tusaale ahaan iyadoo loo marayo booqasho ama wicitaan telefoon. Markaas waxaa la tixgeliyaa baahida ilmaha, kulankuna wuxuu u dhici karaa si taageero lala soconayo ama ilaalo/korjoogtayn.

Wadajooggu/kulanku wuxuu ku dhici karaan booqasho, wicitaan telefoon, waraaqo ama wadahadal muuqaalah (video). Booqashadu waxay inta badan u baahan tahay oggolaansho laga helo Waaxda daryeelka dembiileyaasha iyo oggolaansho ka timaada waalidka mas'uulka ka ah ilmaha.

Inaad booqato xabsiga rumaanka (häkte) ama xabsiga caadiga ah waxay kicin kartaa dareenno xooggan. Carruurtu waxay u baahan yihiin diyaargarow, taageero iyo fursad ay kaga hadlaan booqashada ka hor iyo ka dibba. Xusuusnow, xaaladdan, ilmuhu waa kan xaqa u leh inuu la kulmo waalidkiis, balse ma aha xaqa waalidka inuu xiriir la yeesho ilmaha.

Diyaargarowga acnihiisu wuxuu yahay in ilmaha loo sheego sida meesha ay u eg tahay, xeerarka khuseeya, waxa dhici doona inta ay booqashadu socoto iyo muddada ay qaadanayso. Waxaad horay u sii daawan kartaan sawirro ama muuqaallo, tusaale ahaan adigoo isticmaalaya websaydka ”Insidan” ee Waaxda daryeelka dembiileyaasha oo loogu talagalay carruurta. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in ilmaha la siiyo fursad uu su'aalo ku weyddiiyo, ku sheego dareenkiisa, laguna qanciyo inay caadi tahay in la dareemo farxad, walaac ama inuu ka shakiyo kulanka soo socda.

Sawir QR-ka koodka si aad u tagto bogga Insidan, ama ka raadi www.insidan.kriminalvarden.se



# Ku saabsan Bufff

Marka xoriyada qofka lagaa qaado ma saamayno qofka oo keliya ee waxay saameysaa qoyska oo dhan - laakiin waxaa saameynta ugu weyn ay ku dhacdaa carruurta. Waa wax caadi ah inay dareemaan walaac, murugo, caro, jahawareer ama ceeb. Carruur badan waxay xambaarsan yihiin su'aalo aanay ku dhiirranayn inay qof weyddiiyaan, fikrado aanay rabin inay kor ugu dhawaaqaan, ama dareenno ay ku adag tahay inay erayo u helaan. Sidoo kale, dad badan oo waaweyn ayaa dareema kelinimo marka ay timaaddo sidii ay uga soo bixi lahaayeen mas'uuliyadda saaran. Sidaas darteed ayey Bufff u jirtaa – si aanay qoysna ugu baahannin inay keligood ku ahaadaa xaaladdan.

Bufff waa urur u dooda xuquuqda carruurta, kaas oo taageera carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaskooda marka qof qoyska ka mid ah xoriyada laga qaado. Waxaanu ognahay sida ay ugu adag tahay carruurta marka qof muhiim u ahaa uu si lama filaan ah uga maqnaado – sida ay nolosha caadiga ahi si kedis ah isu-bedbedeleyso, dareenaduna u noqonayaan kuwo badan oo xooggan. Waxaanu u joognaa in aanu ku dhageysanno, ku taageerno, oo aanu qoysaska ka caawinno inay u dhabar-adaygaan muddadan adag.

Waxaanu leeyahay hawlo taageero oo ballaaran kuwaas oo ku qotoma taageero qof kasta lagu waafajinayo baahidiisa, halkaas oo aanu kula kulanno qoyska oo dhan. Marka laga soo tago siinta taageerada, waxaanu sidoo kale ka shaqaynaa faafinta aqoonta iyo saameynta siyaasadeed si loo xaqiijiyo in xuquuqda carruurta la dhowro. Waxaanu leenahay khibrad dheer oo ku saabsan la kulanka carruurta iyo dadka waaweyn ee ku jira xaaladdan, waxaanu ognahay inay suurtogal tahay in la helo xoog ama tamar, rajo iyo ammaan – xitaa marka noloshu u muuqato mid qasan (fawdo ah). Taageeradayadu mar walba waa lacag-la'aan, waana mid ikhtiyaari ah (aad adigu dooranayso), waxaanu mar walba ka duulaynaa baahida carruurta.

Bufff waxay u dagaallantaa xuquuqda carruurta ee ah inay ahaadaan carruur uun.

# Waxay Bufff qaban karto

Bufff waxay bixisaa taageero dhinaca dareenka ah iyo mid wax-ku-ool ah oo loogu talagalay qoysaska ku jira xaalad nololeed adag. Tan waxaa tusaale ahaan ka mid noqon kara:

- **Taageero dhanka wadahadalka ah** – kaas oo loogu talagalay carruurta, dhallinyarada, iyo dadka waaweyn, ha noqoto qof ahaan ama koox ahaan. Bufff waxay bixisaa wadahadal ku salaysan taageero bini-aadannimo. Ma bixinno daawayn ama teraabiyo (terapi), wadahadalladana lama diiwaangeliyo, waana kuwo ku xiran doonistaada. Adiga ayaa go'aaminaya waxa uu wadahadalku ku saabsan yahay, adiguna waxaad si madax-bannaan u go'aansanaysaa waxa aad sheegayso iyo inta aad ka sheegayso.
- **Goobo ammaan ah oo lagu kulmo** – halkaas oo carruurta iyo dhallinyaradu ay kula kulmaan dad kale oo ku jira xaalad la mid ah tan ay iyagu ku jiraan.
- **Kooxaha carruurta- iyo dhallinyarada** – halkaas oo carruurta iyo dhallinyaradu ay kula kulmaan dad kale oo ku jira xaalad la mid ah tan ay iyagu ku jiraan.
- **Waxqabadyada qoysaska iyo xerooyinka (läger)** – si loo dhiso xiriiro, loo abuuro fursad nasasho, loona siiyo farxad.
- **Macluumaad iyo hagitaan** – si loo dhiso xiriiro, loo abuuro fursad nasasho, loona siiyo farxad.
- **Taageerada ehelka** – si loo dhiso xiriiro, loo abuuro fursad nasasho, loona siiyo farxad.
- **Taageero ku saabsan la xiriirka daneeyeyaasha kale** – Tusaale ahaan dugsiga, adeegga bulshada ama daryeelka ciidanka asluubta, haddii aad adigu rabto.
- **Taageero aad ku heli karto teleefoon, iimayl ama wada-sheekeysi qarsoodi ah** - Adiga ayaa go'aaminaya waxa aad rabto inaad nala wadaagto.

Waxaanu la kulannaa qoyska oo dhan – ilmaha, qofka ilmaha mas'uulka ka ah iyo xaaladaha qaarkood xitaa qofka xoriyadda laga qaaday – laakiin had iyo jeer waxaan udub-dhexaad ka dhignaa waxa u wanaagsan ilmaha.

# Waxa aanay Bufff qaban karin

Dhammaan shaqada Bufff waxay udub-dhexaad u ah xaaladda iyo baahida carruurta. Had iyo jeer waxaanu carruurta dhignaa booska kowaad. Laakiin xilka nala saaray waa mid xaddidan, taasina waxay ka dhigan tahay inay jiraan waxyaabo badan oo aanaan awoodi karin ama aan na loo oggolayn in aanu samaynno. Tusaale ahaan:

- Kama qayb qaadanno geedi socodka dacwada maxkamaddaha
- Ma gaarno wax go'aanno ah oo ku saabsan mas'uuliyadda iyo daryeelka ilmaha, xiriirka/kulanka ama deegaanka ilmaha
- Ma xukunno annagu dembi ama dembi-la'aan toona
- Ma maamulno arrimaha socdaalka ama soo galootiga
- Ma sameyno wax dukumenti ah oo lagu isticmaali karo dacwadaha maxkamaddaha
- Ma bixino taageero dhaqaale ama talooyin dhinaca sharciga ah
- Ma hayno macluumaad sir ah oo ka yimid hay'adaha dawlada

Si kastaba ha ahaatee waxaanu leenahay mas'uuliyadda ilaalinta sirta, wax kasta oo aad nala wadaagtana annaga oo keliya ayey nagu egyihiin – haddii aanad adigu wax si kale u doonayn.

Bufff waxay u joogtaa inay ku dhegeysato, ku taageerto, kuna gargaarto. Uma baahnid inaad keligaa ahaato – haddii aad tahay ilmo, dhallinyaro ama qof weyn intaba. Waxaanu u joognaa in aanu abuurno ammaan marka ay noloshu gilgilanayso, iyo inaad dareento inay jirto 'faham wadajir ah' – xitaa markay u muuqato inay dunidu tahay mid aad u kala qaybsan.

# Miyaad doonaysaa inaad intaa ka badan ogaato?

## Buugga aan ugu talagalnay ehelka (Anhörigbok) waxaad ka akhrisan kartaa waxyaabahan oo dhan iyo kuwo kale oo badan.

Raac koodkaQR-ka si aad u akhrisato Buugga Ehelka (Anhörigboken) adigoo isticmaalaya aaladaha digitalka ah, ama la xiriir Bufff si laguugu soo diro nuqul daabacan. Macluumaadka xiriirka waxaad ka helaysaa bogga ugu dambeeya.

Buugga Ehelka loogu talagalay waa agab taageero oo ay soo diyaarisay Bufff. Waxaa ku jira macluumaad si fudud lagu heli karo oo ku saabsan sida uu u shaqeeyo nidaamka garsoorku, xuquuqda carruurta, dareennada kala duwan ee laga bixiyo xaaladdan, sida aad xiriir ula yeelan karto qofka qaraabada ah ee xiran iyo halka aadayso si aad u heli karto taageero. Buuggu wuxuu sidoo kale kor u qaadayaa codadka carruurta, su'aalaha caadiga ah iyo fahamka khaldan ee laga bixiyo xaaladdan, isagoo bixinaya talooyin wax ku ool ah oo loo adeegsan karo maaraynta xaaladaha adag.

# Halkan ayaad ka heleysaa Bufff

Bogga websaydkayaga waxaad ka helaysaa macluumaadka xiriirka ee xafiisyadayada maxaliga ah. Macluumaad dheeraad ah waxaad ka helaysaa bogga dambe ee buuggan yar (broschyren).



**Ku socota qofka ehelka ah waxaa soo saaray:**

**Bufff Sverige**
Prästgårdsgränd 2
125 44 Älvsjö

**Tryckår:**
2025

**Textredigerare:**
Selene Cortes

**Redaktör och text:**
Alejandra Castaneda

**Illustration och layout**
Rajmonda Rexhi

## Miyaad u baahan tahay taageero iyo talooyin dheeraad ah?

**Telefoon ku xiriirinaya:** 08-501 293 10
**Mejl:** info@bufff.se
**Telefoonka taageerada:** 020-200 330
**Chatt:** www.bufff.se/chatt
**Hemsida:** www.bufff.se
**Ururada maxaliga ah:**
www.bufff.se/kontakt
**Adress:** Prästgårdsgränd 2, 124 55 Älvsjö

**Bufff.Sverige** **BufffSverige** **Bufff Sverige**

Bufff

Waxaanu siinnaa taageero iyo cod carruurta iyo dhalinyarada uu waalidkood ama xubin qoyskooda ka mid ah uu ku jiro xabsi caadiga ah, xabsi aan la xukumin (häkte), ama daryeelka ciidanka asluubta.